

TALOOYINKA BILAABIDDA EE QOYSASKA

U isticmaalka TalkingPoints Iskaashiga Adag ee Qoyska-Dugsiga

Soo dhawaada, Qoysas!

Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan idin barno TalkingPoints, qalab awood leh oo loo naqshadeeyay inuu kaa caawiyo inaad ku xidhnaato macalimiinta ilmahaaga oo aad taageerto waxbarashada ilmahaaga.

Markaad raacdo tilmaamahan, waxaad xaqijin kartaa inaad sida ugu fiican uga faa'iidaysanayso agabyadan qiiamaha leh oo aad kobciso iskaashi adag oo aad la yeelato barayaasha ilmahaaga.

Diyaar ma u tahay inaad dhaqaqdo! Ma jirto wax habayn ah oo Loo Baahan Yahay

Waxaad si toos ah farriimaha uga heli doontaa macallimiinta ilmahaaga iyagoo isticmaalaya qoraalka farriimaha gaaban ilaa aad doorato mooyee inaad soo degsato app-ka TalkingPoints oo aad gasho. Tani waxay ka dhigan tahay inaad bilaabi karto inaad ka faa'iidaysato isla markiiba TalkingPoints, iyada oo aan wax tallaabo dheeraad ah la qaadin. Haddii aad doorbidi lahayd adeegsiga app-ka, soo degso app-ka oo gal adiga oo isticmaalaya lambarkaaga taleefoonka gacanta.



Ku Keydso Xidhiihdada Macalinka Taleefankaaga

Haddii aadan galin app-ka TalkingPoints ee loogu talagalay Qoysaska, waxaad farriimaha ka heli doontaa macallimiinta iyo xubnaha shaqaalahay iyagoo isticmaalaya qoraalka farriimaha gaaban. Markaad sameyso, hubi inaad ku kaydiso lambarkooda taleefoonkaaga si aad si sahlan ugu hesho!

iPhone-ka ah: Ka taabo lambarka taleefoonka xagga sare ee farriinta, taabo Macluumaadka, taabo Samee Xidhiihd Cusub.

Android-ka: Ka taabo lambarka taleefoonka xagga sare ee farriinta, taabo Ku dar Xidhiihdada, taabo Samee Xidhiihd Cusub.

Faa'iidooyinka uu Leeyahay isticmaalka App-ka

In kasta oo aad ku isticmaali karto TalkingPoints gebi ahaan fariin gaaban ahaan, waxaa jira faa'iidooyin badan oo ku jira soo degsashada iyo isticmaalida app-ka. Waxaad beddeli kartaa dookha luuqadaada, furi kartaa fariin dirista la wadaago si aad ula socodsiiso dhammaan xubnaha qoyska oo aad u isticmaasho shaqaynta qoraal-u-badalida-hadalka ee isgaarsiinta aan sida tooska ah loola tacaamulayn. Intaa waxaa dheer, TalkingPoints waxay bixisaa kuwan soo socda

- TalkingPoints Ed 101: Qeexidda Erayada Waxbarasho ee loogu talagalay Qoysaska - Nidaamka waxbarashada Mareykanka wuxuu leeyahay erayo iyo erayo badan oo la soo gaabiyay oo qoysaska aan sida tooska ah ugu lug lahayn xirfadda waxbarashada aysan u badneyn inay ogaadaan. Sifadani waxa ay tilmaamaysaa erayada waxbarasho ee Maraykanka ee loogu talagalay qoysaska ka muuqda guud ahaan farriimaha)
- Help Me Understand - Taageerada fahamka degdega ah ee loogu talagalay qoysaska! Help me Understand waxay bixisaa hagitaan loogu talagalay Qoysasku si ay ugu fahmaan macnaha guud, erey-bixinta, iyo nuxurka guud ee farriinta riixida badhanka.

Waa ikhiyaarkaaga sida aad u rabto inaad ku hesho fariimahan, laakiin app-ka wuxuu bixiyaa sifooyin dheeri ah oo xoojin kara adeegsigaaga isgaadhsinta. Soo degso app-ka si aad u sahamiso faa'iidooyinkan.

Caawinta iyo Taageerada TalkingPoints

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay caawimaad, kooxda taageerada TalkingPoints aaya diyaar u ah inay ku caawiyaan. Nagala soo xidhiihd addoo isticmaalaya ikhiyaarka "Taageerada App-ka" ee ku jirta habaynada app-ka ama iimayl toos ah ugu soo dir kooxdayada Taageerada Qoyska barta family@talkingpts.org.